



Australian
BORDER FORCE

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan karantiilka khasabka ah ee rakaabka u safraya Australia.

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan qabanqaabinta karantiilka khasabka ah ee loogu talagalay rakaabka imanaya Australia

13 Ogos 2020

Iyada oo laga jawaabay cudurka faafa ee COVID-19, Australia waxay dejisay xayiraad xagga safarka ah iyo shuruudaha karantiilka ee khasabka ah.

Dhammaan rakaabka imanaya Australia waxay ku xidhan yihiin karantiil khasab ah 14 maalmood dekeddooda ugu horreysa ee ay yimaadaan Australia.

Socotada waxaa lasiin doonaa hoy ku haboon inta lagu jiro mudadan loomana ogolaan doono inay ku safraan wadanka gudihiisa (oo ay kujiraan guryahooda ay dagan yihiin) ama ay kusii socdaan shafarka gudaha ah ilaa iyo inta mudada karantiilka ah ee 14ka ay ka dhameysaneyaan.

Dowladaha gobolka iyo taritoriga, oo taageero ka helaya Dowladda Australia, ayaa maareynaya qabanqaabinta karantiilka. Gobollada iyo taritoriyada badankood, waxaa lagaa codsan doonaa inaad bixiso tabaruca kharashka karantiilka. Macluumaad dheeri ah waxaa laga heli karaa bogga caafimaadka ee dowlad-goboleedka iyo taritoriyada.

Rakaabka Transidka -ah

Rakaabka transid-ka caalamiga ah ee imanaya Australia waxay ku bixi karaan duulimaad kale oo caalami ah oo ka taga magaalada aad timid. Rakaabka Transid-ka waa inay

- joogi garoonka diyaaradaha haddii ay tahay in ay sugaan duulimaadka soo socda, illaa 8 saacadood
- tagaan karantiil khasab ah oo ku yaal xarun loogu talagalay gobolka haddii sugitaanka diyaaradda xigta ay tahay 8 illaa 72 saacadood

Rakaabka transid-ka ah kuma safri karaan Australia gudaheeda, xitaa si ay ula kulmaan duulimaad caalami ah oo tagaya magaalo kale.

Maxaa laga filan karaa markaad timaado Australia

- Waxaa lagaa doonayaa inaad raacdo dhamaan tilmaamaha ay kusiiyaan shaqaalaha diyaarada iyo saraakiisha dowlada markii aad timaadid Australia.
- Waxaad soo qaadan doontaa shandadahaaga waxaadna mari doontaa howlaha nadiifinta xuduudaha ee caadiga ah (caadooyinka, socdaalka iyo badbaadada noolaanshaha).
- Marka la cadeeyo soohdinta, saraakiisha dowladda ayaa kugu jiheyn doona basaska kaa qaadi doona goobta aad degan tahay.
- Waxaa laga yaabaa inaad sugto waqti muhiim ah ilaa aad ka imaaneyso hoygaaga. Saraakiisha dowladda waxay ku dadaali doonaan inay ka dhigaan muddooyinkan sugitaannada sida ugu macquulsan. Wadashaqeyntaada iyo dulqaadkaaga waa la qadarinayaa.

Qabanqaabada mudada karantiil ee 14 maalmood

- Saraakiisha dowladda ee ku jira xerada karantiilku waxay sugayaan imaatinkaaga. Waxay ku farxi doonaan inay ka jawaabaan wixii su'aalo ah ee laga yaabe inaad qabtid ka dib imaatinkaaga iyo inay ku caawiyaan muddada karantiilnimada ah.
- Hoygu wuxuu yeelan doonaa dhammaan qalabka iyo adeegyada aad u baahan doonto intaad joogto. Hoyga waxaa ku jiri doona hoy ammaan ah oo nadaafad leh, cunto iyo biyo iyo taageero caafimaad.
- Haddii aad u baahato baahi caafimaad, tusaale ahaan daawooyinka lagu qoro ee daawooyinka caadiga ah, abaabul ayaa la sameyn doonaa si loo fududeeyo shuruudahaan.
- Waxaa lagaa baari karaa COVID-19 48-da saacadood ee ugu horreeya ka dibna inta u dhexeysa maalmaha 10 illaa 12 ee karantiil. Haddii aad diido baaritaanka, waxaa laga yaabaa inaad karantiil ku sii jirtid muddo dheer. Qabanqaabada imtixaanka saxda ah waxay kuxirantahay gobolada iyo taritoriyada.
- Sida uu dhigayo sharciga Biosecurity Act 2015 iyo sharciga gobolka ee khuseeya, waxaa lagaa doonayaa inaad ku sii jirto hoyga loo qoondeeyay illaa inta caafimaad ahaan lagaa fasaxayo inaad gasho bulshada Australia.



Australian
BORDER FORCE

**Macluumaad muhiim ah oo ku
saabsan karantiilka khasabka ah
ee rakaabka u safraya Australiya.**

Qabanqaabada waxaa fulin doona dowladaha gobolka iyo territoriska waxaana taageeraya hay'adaha Dowlada Australiya.

Dhameystirka mudada karantiil ee 14 maalmood

Markaad dhamayso muddada karantiilka ee khasabka ah, waxaad u safri kartaa Australiya gudaheeda. Fadlan la soco in gobolada iyo taritoriyada laga yaabo inay leeyihiin shuruudaha soo gelida iyo karantiil. Waa inaad hubisaa gelitaanka iyo karantiilka shuruudaha dowlad-goboleed kasta iyo taritor kasta safarka ka hor.

Websayta Wasaaradda Caafimaadka ee Dawlada Australiya waxaa ku jira iskuxidhka macluumaadka gobolka iyo taritoriga ee xaddidaadda safarka <https://www.health.gov.au/news/health-alerts/novel-coronavirus-2019-ncov-health-alert/coronavirus-covid-19-restrictions/coronavirus-covid-19-advice-for-international-travellers#quarantine-for-incoming-travellers>